

Warside bille ah oo ay soo saarto hay'adda Gargaarka Africa 'ARC'

(7PAGE) TUESDAY ,2 August 2022 Muharram 1444 Hargeisa-Somaliland

Xarumaha Waxbarashada Iyo Mac-hadyada Kuwe ytigu Waxa Ay Farxad ku Soo Dhoweynayaan Soo Noqoshada Ardaydooda Sannad-Dugsiyeedka Cusub ee 2022/2023

SANNAD WANAAGSAN IYO SOO
NOQOSHO FARXAD LEH

KA AKHRI CADADKAN

- In ka badan 27 kun oo qoys oo ka faa'iidaystay mashruuca Oxdada
- Olole caafimaad oo bilaash ah ayaa Boorama laga fuliyey
- 70 Barayaasha xarumaha Kuweytiga ah oo tababar la siiyey
- Wasiirka warfaafinta oo booqasho ku yimid xarunta ARC
- Soo dhoweyn loo sameeyey ardayda cusub ee mac-hadka farsamada gacanta
- 400 oo arday oo u tartamay deeq-waxbarashada farsamada gacanta ah
- Guddoomiyaha ARC oo booqday dhismaha cusub ee Cisbitaalka Caalamiga ah ee Hargeysa

In Ka Badan 27 Kun Oo Qoys Ayaa Looga Faa'iideeyey Mashruuca Hilibka Odxada

Qoysas tiradoodu ka badan tahay 27 kun iyo 126 ayaa ka faa'iidaystay mashruuc xilliyeedka qaybinta hilibka Ciidda Al-Adxa ee 1443 H / 2022 oo ay sannad kasta hay'adda Gargaarka Afrika – ARC ka fuliso Somaliland, Soomaaliya iyo dawlad deegaanka Soomaalida Itoobiya. Mashruucan oo munaasabadda Ciidda lagu quudinayey qoysaska saboolka ah ee deegaannadan ayaa gaadhay dad tiradooda lagu qiyaasayo 162 kun iyo 756 qof. Waxaa oo loo qaybiyey hilibka xoolo isugu jiray 126 neef oo Lo' ah, 4,521 neef oo Adhi ah iyo 20 neef oo Geel ah, kuwaas oo ay maalgelisay hay'adda Caalamiga ah ee ALRAXMA ee dalka Kuweyt oo kaashanaysa dad samafalayaal ah oo u dhashay dalkaas, waxa kale oo iyaguna sannadkan qayb ka noqday hay'addo kale oo samafal oo caalami ah. Mashruucan ay fuliso ARC ayaa ay ujeedadiisu tahay in farxadda Ciidda la gaadhsiyo dhammaan guryaha iyo quluubta muwaadiniintan si ugu yaraan maalin-taas ay farxadda iyo cibaadada munaasabaddan ula qaybsadaan walaalahooda Muslimiinta ee damaashaadaya. Maamulka hay'adda ARC ayaa bogadiyey dadaalka samafalayaasha kala duwan ee mashruucan bulsho.



ARC Oo Diyaarisay 3 Ceelbiyood Oo Waraabinaya 900 Oo Qof.

Hay'adda Gargaarka Afrika – ARC ayaa dhammaystirtay qodaalka iyo diyaarinta saddex ceelbiyood oo ay ka hirgelisay deegaannada Marka iyo Afgooyoe ee Soomaaliya. Ceelashan oo dhismahoodu uu sabbad yahay, laguna rakibay bamb gacmeed biyaha ka soo saaraya, waxa uu mid kasta cabbirkiisu dhan yahay 15 Mitir Kuubiyik. Waxa aanay awood u leeyihiin in ay daboolaan baahida biyood 150 qoys oo u dhigma illaa 900 oo qof. Qodaalka ceelashan ayaa qayb ka ah mashaariicda biyaha iyo dada-



allada ay hay'adda Gargaarka Afrika – ARC ugu jirto in biyo nadiif ah loo helo muwaadiniinta deggen dhulka oomana ah, si loo yareeyo khatarta biyo yaraanta ee xilliyada abaaraha.

Olole Caafimaad Oo Lacag La'aan Ah Ayaa Laga Fuliyey Magaalada Boorama

Kolonyo caafimaad oo ay ku jiraan dhakhaatiirta takhasusyada Carruurta, Haweenka iyo Dhalmada, Qalliinka iyo Kaadi Mareenka, Qalliinka Wadnaha, Uur ku jirta, iyo Indhaha ayaa adeegyo caafimaad uga faa'ideeyey 400 oo ka mid ah dadka saboolka ah ee deegaanka dadku ku badan yihiin ee Sararka, duleedka magaalada Boorama.

Dhakhaatiirta oo ka socday cisbitaalka Caalamiga ee Boorama ayaa dadkan u sameeyey fadhiyo xaal-waraysi iyo la talineed, iyo baadhitaannadii caafimaad ee xaaladdooda la xidhiidhay, iyada oo shaybaadhada iyo dawadana lacag la'aan lagu siina-



yey, isla markaana xaaladaha culus loo gudbinayey xarunta cisbitaalka Caalamiga ah ee magaalada Boorama.

Kolonyadan maalgelinteeda waxaa hay'adda ARC ka caawisay hay'adda samafal ee Horumarinta oo dalka Kuweyt laga leeyahay.

Hay'adda ARC si joogto ah ayaa ay goballo kala duwan oo Somaliland ah uga fulisaa mashaariicda caafimaad ee daryeelka saboolka, iyada oo kaashanaysa cisbitaallada Caalamiga ee Hargeysa iyo Boorama oo ay iyadu hirgelisa. Waxa aana lagu gaadhaa deegaannada ay ku badan tahay saboolnimada iyo dadka ka fog cisbitaallada, si loo caawiyo, loogalana qayb qaato dhimista dhibaataada caafimaad darro ee deegaanka iyo guud ahaan dalka.

Guddoomiyaha ARC Ayaa Soo Indha-Indheeyey Dhismaha Cusub Ee Cisbitaalka Caalamiga Ah Ee Hargeysa



Dr. Cabdiraxmaan Almucallimi, guddoomiyaha guud ee hay'adda Gargaarka Afrika – ARC ayaa 31 kii July 2022 soo indha-indheeyey hawlaha dhismaha iyo diyaarinta dhismaha cusub ee cisbitaalka Caalamiga ah ee Hargeysa.

Guddoomiyaha waxaa booqashadan ku wehelinayey madaxa kormeerka injineeriyadda ee cisbitaalka, iyo madaxa mashaariicda dhismaha iyo ceelasha ee hay'adda ARC. Muddadii ay booqashadan ku guda jireenna waxa ay u kuurgaleen habsami u socda hawlaha shaqo iyo farsamo ee dhismaha.

Dabayaaqadii sannadkii 2021 kii ayaa madaxweyne ku xigeenka Somaliland mudane Cabdiraxmaan Cabdillaahi Ismaaciil (Saylici) uu dhagax dhigay dhismaha cisbitaalka Caalamiga ah ee Hargeysa oo ku yaalla xaafadda Masallaha.

Cisbitaalkan oo ay maalgelinayso hay'adda Caalamiga ah ee ALRAXMA, dalka Kuweyt waxa loo farsameeyey si waafaqsan halbeegyada Caalamiga ah ee cisbitaallada casriga ah loogu talagalay. Waxa uu ku fadhiyaa dhul cabbirkiiisu dhan yahay 11 kun iyo 400 oo mitir labajibaaran ah, waxa aanu yeelan doonaa qaybo si casriya u qalabaysan oo bixiya takhasusyo tiradoodu 20 tahay, iyo waaxyaha ay ka mid yihiin daryeelka xaaladaha culus (ICU), gurmada degdegga ah iyo qalliinada casriga ah ee wadnaha, iyo kelyaha



Mac-hadka Farsamada Gacanta Ee Kuweytiga Ayaa Imtixaan Ka Qaaday Arday Deeq-waxbarasho Soo Codsatay

Mac-hadka farsamada gacanta ee xarunta Kuweytiga magalada Hargeysa ayaa imtixaan kala saaris ah ka qaaday 400 oo ah arday soo codsatay deeqwaxbarasho, sannad dugsiyeedka 2022/2023 ka. Deeqdan oo ay maalgelisay hay'adda calamiga ah ee Concern Worldwide, waxaa kormeerkiisa lahaa wasaaradda waxbarashada iyo Sayniska Somaliland, waxaana fulinaya Mac-hadka farsamada Gacanta ee Kuweytiga oo hoos yimaadda hay'adda Gargaarka Afrika – ARC.

Dr. Cabdiraxmaan Mucallimi, guddoomiyaha guud ee ARC oo uu wehelinayo agaasimaha Mac-hadyada farsamada Gacanta ee Kuweytiga, Mudane Xuseen Mutawali iyo madaxa xidhiidhka dadweynaha ee Xarunta Yuusuf Khidma ayaa soo indha-indheeyey qaybo ka mid ah goobaha imtixaanka lagu qaadayey si ay ugu kuurgalaan habsami u socodkooda, waxa aanay kulamo xogwaraysi ah la yeesheen guddiyada imtixanaadka ee Mac-hadka Farsamada gacanta iyo xirfadaha ee Kuweytiga.



Mudane Mucallimi waxa uu bogaadiyey midha dhalka dadaalka hay'adda 'Concern Worldwide ay la kaashatay wasaaradda waxbarashada, isaga oo ku ammaanay iskaashiga ay la leedahay mac-hadyada iyo xarumaha waxbarashada ee hay'adda Gargaarka Afrika – ARC. Dhinaca kalana waxa uu ardayda ku dhiirrigeliyey in ay la yimaaddaan niyad togan, dadaal iyo hawl badan si ay uga gudbaan imtixaankan ay ku helayaan deeqda waxbarasho oo isugu jira qoraal iyo waraysiba.

Dr. Xuseen Mutawali ayaa isaguna dhinaciisa caddeeyey in ardaydan u fadhiisatay imtixaanka qiimaynta ah oo ka qabsomay mac-hadyada farsamada gacanta ee Hargeysa iyo Boorama ay tiradoodu dhan tahay 400, waxa aanay u tartamayaan 130 kursi oo ah deeqda waxbarashada oo isugu jirta Farsamada Alamuuniyaamta, Nijaaradda iyo Tolmaha.



Mac-Hadka Farsamada Gacanta Oo Munaasabad Soo Dhoweyn Ah U Sameeyey Ardayda Cusub

Mac-hadka farsamada gacanta iyo xirfadaha ee xarunta Kuweytiga ayaa munaasabad soo dhoweyn ah u sameeyey ardayda cusub ee sannad dugsiyeedka 2022/2023 ku soo biiraysa waxbarashada xarunta. Mudane Cabdalcasiis Muxamed, Agaasimaha waaxda farsamada gacanta ee wasaaradda waxbarashada iyo Sayniska Somaliland oo munaasabaddan hadal ka jeediyey ayaa bogaadiyey mac-hadka, dhinacyada taageera iyo hawl wadeennadiisaba. Waxa aanu hoosta ka xariiqay muhiimadda ay Barashada farsamada gacantu leedahay, isaga oo ballanqaaday in wasaaraddu ay diyaar ula tahay in ay la garab istaagto taageerada iyo iskaashiga uu u baahanyahay, si ay ku jirto danta ardayda muwaadiniinta ah iyo dalku guud ahaan. Waxa kale oo munaasabaddan ka soo qaybgalay, hadallo dhiirrigelin iyo bogaadin isugu jirana ka jeediyey masuuliyiin ka socday hay'adda CONCERN WORLDWIDE oo maalgelisa deeqo tababar farsamada gacanta ah oo uu mac-hadku bixiyo iyo sida oo kale masuuliyiinta mac-hadka, maamulka mac-hadka, agaasimaha waaxda xidhiidhka dadweynaha ee



hay'adda Gargaarka Afrika – ARC oo uu mac-hadku hoosta go, iyo waalidiinta ardayda. Munaasabadda waxa kale oo qayb ka ahaa barnamaj wacyigelineed oo ardayda lagula dardaarmayey, laguna siinayey hagayaasha iyo tilmaamaha nidaamka mac-hadka iyo talooyinka muhiimka u ah waxbarashada.

Tababarka Barayaasha iyo Hawlwadeennada Xarunta Kuweytiga Ee Somaliland



Mudane Ciid Cabdalladiif, agaasimaha waaxda waxbarashada ee hay'adda ARC oo tababarkan ka hadlay ayaa sheegay in uu yahay barnaamij ujeedadiisu ay tahay horumarinta tayada iyo kartida shaqo ee macallimiinta, kormeerayaasha, iyo barbaariyayaasha kala duwan, si loo gaadho himilada xarunta waxbarashadu ay higsanayso in ay ardaydeedu gaadhaan sannad dugsiiyeedkan cusub. Maamulaha guud ee ARC, Mudane Dr. Cabdiraxmaan Almucallimi oo isna ka hadlay tababarkan ayaa dhinaciisa waxa uu agaasinka waxbarashada ee hay'adda ku ammaanay dadaalka ay ku bixiyeen hawlaha waxbarashada ee xarumaha Kuweytiga, waxa aanu ku boorriyey in ay sii laban-laabaan, maadaama oo ay waxbarashadu ka mid tahay yoolasha istaraatiijiga ah ee hay'adda ARC ee xarumaha Kuweyt ay hoos tagaan.

Xarunta waxbarashada ee Kuweytiga magaalada Hargeysa ayaa barnamijyo tababar siisay 70 ka mid ah barayaasha, kormeerayaasha iyo maamullada goobaha waxbarasho ee hoos yimaadda. Tababarradaas oo loogu diyaar garoobayo bilowga sannad-dugsiiyeedka cusub ee 2022/2023, waxaa halku-dheg u ahaa 'Tayadu waa xil qof kasta saaran', waxa aana goobjoog ka ahaa tiro ka mid ah aqoonyahanka iyo barayaasha sare ee jaamacadaha Somaliland.

Waxyaabaha la baray waxaa ka mid ahaa; Yoolsha waxbarashada iyo Barbaarinta ee xarumaha waxbarasho ee ay taageerto hay'adda Caalamiga ah ee ALRAXMA; gaar ahaan marxaladaha koritaanka ee hore, iyo cimri kasta waxyaabaha u gaarka ah; Halbeegyada tayada waxbarashada, iyo heerka laga filayo qalinjebiyayaasha; xirfadaha iyo anshaxa looga baahanyahay macallimiinta; Barnaamijyada fasaxa xagaaga loo qabto ardayda iyo raadka ay ku yeeshaan barbaarintooda; kulamada hawleed ee macallimiinta, iyo gorfaynta dhukumantiyada iyo xeerarka anshax ee waaxda waxbarashada hay'adda Caalamiga ah ee ALRAXMA.



Xadhig Ka Jarista Xarun Loogu Talagalay Barashada Qur'aanka



Hay'adda Gargaarka Afrika – ARC ayaa xadhiga ka jartay dhismaha xarun loogu talagalay xiftiga Qur'aanka Kariimka ah oo ay ka hirgelisay degmada 26-Juun ee magaalada Hargeysa. Xaruntan oo ku fadhida dhul cabbirkiiisu dhanyahay 50 mitir oo isku wareeg ah ayaa ka kooban laba fasal oo qalabkooda iyo agabkooda waxbarasho loo dhammaystiray.

Munaasabadda xadhig ka jarka waxaa ka qaybgalay Ciid Cabdalladiif, agaasimaha waaxda waxbarashada ee hay'adda ARC iyo isuduwaha mashaariicda hay'adda Mudane Da'iid Axmed oo ay weheliyaan tiro ka mid ah haldoorka qaybaha bulshada xaafadda dugsigan ka faa'iidayaan doonto.

Dr. Cabdiraxmaan Mucallimi, guddoomiyaha guud ee hay'adda ARC ayaa muujiyey farxaddiisa ku aaddan dham-

maystirka iyo furitaanka xaruntan, isaga oo sheegay in hadda uu socdo isku dubaridka qorshe ay hay'addu doonayso in wasiirka awqafta iyo arrimaha Diinta ee Somaliland uu si rasmi ah xadhigga uga jaro tiro ah xarumo lagu baranayo Qur'aanka Kariimka ah oo ay ARC dhismahooda iyo qalabayntoodaba ka hirgelisay deegaanno kala duwan oo ka mid ah Somaliland.

Dhinaca kalana waxa uu guddoomiyuhu u mahadnaqay hay'adda Caalamiga ah ee ALRAXMA iyo samafalayaasha reer Kuweyt ee aalaaba taageera mashaariicda ay hay'adda ARC ka fuliso Somaliland, Soomaaliya iyo guud ahaan dhulka Soomaalida ee gobalka Geeska Afrika.

Wasiirka warfaafinta iyo wacyigelinta oo booqasho ku yimid xarunta ARC



Dr. Cabdiraxmaan Al-Mucallimi, guddoomiyaha guud ee hay'adda Gargaarka Afrika - ARC ayaa xarunta hay'adda ku soo dhoweeyey wasiirka warfaafinta, dhaqanka iyo wacyige-

linta Somaliland, mudane Saleebaan Yuusuf Cali Koore oo booqasho ku yimid xarunta dhexe ee hay'adda. Booqashada wasiirka ayaa daarranayd in la isla eego siyaabaha ay hay'adda iyo wasaaraddu isaga kaashan karaan hawlaha warbaahineed ee mashaariicda iyo Barnaamijyada hay'addu ay ka waddo Somaliland, iyo sida oo kale xidhiidhka laba geesoodka ah ee wasaaradda iyo hay'adda Gargaarka Afrika - ARC oo ka wakiil ah hay'adda Caalamiga ah ee ALRAXMA, dhinacyada kala duwan ee iskaashigaas iyo siyaabaha loo sii xoojin karo. Wasiirku waxa uu iftiimiyeey taageerada joogtada ah ee ay hay'adda ARC ka hesho warbaahinta qaranka, iyo sida ay u dhiirrigeliso habsami u socodka waajibaadka ay hay'addu u qabanayso shacabka Somaliland. Isaga oo dhinaca kalana hay'adda ku ammaanay in iyada qudheedu ay kaalin ka qaadato wacyigelinta iyo faafinta xogta saxda ah ee la xidhiidha barnaamijyadeeda samafal.

Kulankan waxa kale oo goobjoog ka ahaa agaasimaha mashaariicda caafimaadka ee ARC Dr. Yaasir Darwiish iyo madaxa waaxda xidhiidhka dadweynaha mudane Yuusuf Maxamed.

Xarumaha Waxbarashada Ee Hoos Yimaadda ARC Oo Bilaabay Sannad-Dugsiyeedka Cusub



Sannad-dugsiyeedka cusub ee 2022/2023 ayaa si rasmi ah uga bilowday dhammaan xarumaha waxbarashada iyo farsamada gacanta ee hoos yimaadda hay'adda Gargaarka Afrika. Maa-lintii sabbidii 8 August 2022 ayaa ay ardaydu dib ugu soo noqotay dugsiyada heerarka kala duwan ee xarumaha Kuweytiga - Hargeysa, AL-NUUR - Boorama, DAARU-XANNAAN - Burco, iyo MUSTAQBAL - Laascaanood oo Somaliland ah, iyo sida oo kale xarunta AL-AMAL - Garoowe, Puntland,

Dugsiyada Muqdisho iyo Koonfurta Soomaaliya iyo dawlad-deegaanka Soomaalida Itoobiya. Masuuliyiinta waxbarashada iyo Barbaarinta ee xarumahan ayaa ardayda ku qaabilay munaasabado farxadeed, waxa aanay soo dhoweyn, wacyigelin iyo barnamijyo hannuunineed gaar ah u sameeyeen ardayda sannad dugsiyeedkan ku cusub. Waxaa xusid mudan in agaasinka waxbarasho ee xarumahan kala duwan ay hore barayaasha dugsiyadan ugu

qabteen tababarro kala duwan oo loogu diyaargaroobayey sii horumarinta iyo tayeynta waxbarashada iyo Barbaarinta sannad-dugsiyeedka cusub. tallaabadaas oo qayb ka ah qorshaha guud ee ay hay'adda Gargaarka Afrika - ARC ugu talagashay horumarinta iyo tayeynta macallimiinta oo udub dhexaad u ah rumaynta higsiga fog ee waxbarashada oo ah in la helo waxbarasho tayo leh oo casriya.





مجلس التعاون الإفريقي

كلنا أسرة واحدة



لجنة أفريقيا للإغاثة
AFRICAN RELIEF COMMITTEE

أثر .. يبقى

[Twitter](#) [Facebook](#) [YouTube](#) [Instagram](#) @africanreliefco

مسارات
خيرية CHARITABLE
PATHS